

Qaladaadka Wakhtiga Imaanshaha iyo Bixidda

| Farriin Qalada | Tillaabada loo Baahan Yahay |
|---|---|
| “Ma jiro oggolaansho shaqaynaya oo boggaan leeyahay. Fadlan la xiriir horjoogahaaga.” | <ul style="list-style-type: none"> • Tani waxay la mid tahay in aan ku helayn foojar boostada isagoo isticmaalaya nidaamka foojarka waraaqda ah. Oggolaanshaha macmiilku ma aha mid wakhtiga la socda. • La xiriir Xafiiska Deegaankaaga si aad u xalliso sida ugu dhakhsaha badan si aad u hubiso in laguu oggol yahay inaad shaqayso. |
| “Waxaad isku-dayeysaa inaad galiso is-xaadirinta taariikh adeeg oo ka baxsan taariikhda saaritaanka macmiilka. Fadlan la xiriir horjoogahaaga.” | <ul style="list-style-type: none"> • Macmiilka looma oggola inuu helo adeegyo taariikhda aad galisay. La xiriir Xafiiska Deegaankaaga si aad u xalliso. |
| “Waxaad horay ugu haysatay is-xaadirin tan la mid ah nidaamka marka la eego taariikhda iyo wakhtigan. (Aqoonsiga Is-xaadirinta la Laba-Qoray: xxx) Fadlan dooro taariikh/wakhti kale ama la xiriir horjoogahaaga.” | <ul style="list-style-type: none"> • Dib u eeg xogtaada jirta si aad u ogaato xogta la laba-qoray una hagaajiso wixii khaldan. • Haddii xogtu ku jirto xaaladda “Approved” ama “Processed” ayna u baahan tahay in la saxo, fadlan la xiriir Xafiiska Deegaankaaga si laguu caawiyo. |
| “FOB dhibcaheeda bilawga iyo dhammaadku sax ma aha. Ma rabtaa inaad sii waddo Portal Sign Off?” | <ul style="list-style-type: none"> • Hubi in baadisoocyada fob si sax ah loo galiyey. • Haddii baadisoocyada fob ay waafaqsan yihiin waxa aad qortay oo walina aad arkayso qaladkan, guji Yes si aad ugu sii socoto “Portal Sign Off.” Xogta waxaa loo diiwaangalin sidii xog aan waafaqsanayn EVV. |
| “Fadlan gali taariikh sax ah.” | <ul style="list-style-type: none"> • Ma galin kartid taariikh mustaqbalka ah. Hubi in taariikhdu tahay tan maanta ama mid hore. |
| “Wakhtigu ma dhaafsanaan karo wakhtiga la joogo.” | <ul style="list-style-type: none"> • Ma galin kartid wakhti mustaqbalka ah. Hubi in wakhtigu yahay mid hadda taagan ama la soo dhaafay. |
| “Fadlan dooro ugu yaraan hal Jumlad oo Aan Is Baddalin.” | <ul style="list-style-type: none"> • Wuxaad u baahan tahay inaad ka doorato caddaynta qaybta “Jumladaha Aan Isbaddalin” kahor xaqijinta wakhtiga bixitaanka. |

“Wadarta is-xaadirintu kama badnaan karto xxx. Waxaad galisay xxx.”
“Aqoonsiga xogta xxx waa la diiday.”

- Xogaha kama waynaan karaan Tirada Ugu Badan Halkii Is-xaadirin.
- Xogta aad galisay waa la diiday.
- Waxaad u baahan doontaa inaad abuurto xog taariikhed si aad uga warbixiso wakhtigaaga saxda ah.

Xadgudubyada Xeerka Ganacsiga

“Is-xaadirintaadu waxay leedahay hal ama in ka badan oo xadgudub. Fadlan xaqiji natiijooyinka hoose oo dooro ‘Acknowledge.’ Haddii kani ahaa qalad, fadlan baaji oo baddal xogta aad galinayso.”

- Xeerka gaarka ah ee lagu xadgudbay wuxuu ka muuqan hoosta qoraalkan.
- Waxaad heli doontaa farriin ah qaabka OR PTC DCI Messaging Module oo kuu sheegaysa xeerka lagu xadgudbay. Iyadoo ku xiran doorbidyada xisaabtaada, sidoo kale waxaa dhici karta inaad hesho farriin qoraal ah iyo iimeyl laguugu sheegayo in xeer shaqo lagu xadgudbay kuuna tilmaamaya inaad hubiso OR PTC DCI Messaging Module si aad u hesho macluumaad faahfaahsan.
- Adiga (Bixiye Daryeel) ayaa ka masuul ah wax-ka-baddalka wakhtigaaga si aad u xaqijiso inaad ku sugar tahay saacadaha laguu oggol yahay. Haddaad u baahato caawimo, fadlan la xiriir Xafiiska Deegaankaaga.

| Xeerka Shaqo | Tillaabada loo Baahan Yahay |
|--|---|
| Oggolaanshaha Baaqiga Soo Hara | <ul style="list-style-type: none"> • Xogtaada saacadlaha ah ee aad galisay waxay sare u dhaaftay tirada saacadaha la oggol yahay ee qorshaha/oggolaanshaha adeegga macmiilka. • Waxaad u baahan doontaa inaad saxdo wakhtiga aad galisay si aadan markaa uga kor marin saacadaha laguu oggol yahay. La xiriir Xafiiska Deegaankaaga haddaad u baahan tahay kaalmo. • Xogta masaafadda la socdo ee ka badan tirada maylasha la oggol yahay la kaydin maayo. Waxaad u baahan doontaa inaad habayso maylasha kahor inta aadan xogta kaydin. |
| Xogta Is-xaadirinta Shaqaalaha ee Wakhtigeeda la Gudbiyo | <ul style="list-style-type: none"> • Waxaad galin kartaa wakhti/masaafada ilaa 365 maalmood dhaafsiisan taariikhda adeegga. • Fadlan ogow, xogta la galinayo ee taariikhed ma aha mid waafaqsan EVV. |
| Galinta Xogta Is-xaadirinta Taariikhda Bilaabidda Bogga Adeegga Shaqaalaha | <ul style="list-style-type: none"> • Laguuma oggola inaad siiso adeegyo macmiilka taariikhdan. • Xogta aad galisay waa la diiday. • Taariikhda aad bilawday ama joojisay u shaqaynta macmiilka waxaa dhici karta in si qaldan loo galiyey oo |

| | |
|--|--|
| ama Galinta Xogta Is- xaadirinta Taariikhda Dhammaanshaha Bogga Adeegga Shaqaalaha | aad u baahan doonto inaad la xiriirto Xafiiska Deegaankaaga si aad u xalliso. |
| Xeerka Shaqada ee Galinta Xogta Is- xaadirinta Saaritaanka Macmiilka | <ul style="list-style-type: none"> • Macmiilka looma oggolayn adeegyo taariikhdan. • Xogta aad galisay waa la diiday. • Taariikhda uu joojiyey macmiilka helitaanka adeegyada waxaa dhici karta in si qaldan loo galiyey oo aad u baahan doonto inaad la xiriirto Xafiiska Deegaankaaga si aad u xalliso. |
| Galinta Xogta Is- xaadirinta Taariikhda Cayrinta Shaqaalaha | <ul style="list-style-type: none"> • Laguuma ogola inaad bixiso adeegyo taariikhdan. • Xogta aad galisay waa la diiday. • Taariikhda aad joojisay bixinta adeegyada waxaa dhici karta in si qaldan loo galiyey oo aad u baahan doonto inaad la xiriirto Xafiiska Deegaankaaga si aad u xalliso. |